

# TAAGEERADA ARDAYDA EE ISKUULKA HOOSE EE GROVELAND PARK

Haddaan nahay iskuulka Groveland Park Elementary waxaan doonaynaa in ardaydanadu guulaystaan bulsho ahaan, iyo waliba waxbasha ahaan. Waxaa qorshahanaga ka mid ah inaan isticmaalno nidaamyo kala duwan si carruurta u guulaystaan qoysaskuna taageero u helaan.

Nidaamka **Responsive Classroom** waa hab waxbarid oo xoogga saara koritaanka dhinaca waxbarashada iyo waliba bulshada. Ku dhawaad saddex meelood laba meel macallimiinta iskuulka Groveland waxay qaateen tababar ku saabsan nidaamkan. Fasallada waxaa loo qabtaa kulamo lagu dhisayo bulshada islamarkaana la'isku taageerayo.

Erayada **C.A.R.E.S** ayaa laga isticmaali doonaa dhammaan gudaha iskuulka si ardaydu u xasuustaan marka ay wada hadlayaan. Macallimiinta ayaa sharaxaya erayada ku cusub ardayda.

**Cooperation** = Wadashaqayn

**Assertion** = Caddayn/iftiimin

**Responsibility** = Masuuliyad

**Empathy** = Faham

**Self-control** = Is-Xakamayn

**Garashada guusha ardayda iyo dhaqanka fiican** ayaa ah tallaabooyin wanaagsan oo ka dhigaya ardayda inay dareemaan inay bulshada qayb ka yihiin. Shaqaalaha ayaa qiri doona ardayda wanaagga ay sameeyaan waxaana lagu abaal-marin doonaa kaarar ay warbixin fiican ku qorantahay iyadoo laga sheegi doono kulanka iskuulka. Ardaydu waxay ka qaybgalayaan hawlaha ka socda fasallada iyagoo helaya fursad ay ku caawiyaan iskuulka Groveland iyo bulshada Groveland. Sidoo kale, fasallada waxaa lagu baran doonaa in iskuulka Groveland yahay goob nabadeed, waxayna ka qaybgalayaan barashada dulucda nabadda.

Barnaamijyada **Second Steps and Steps to Respect Programs** waa barnaamijyo ku salaysan ka hor-tagga dhibaataaynta iyo hagardaamada waxaana laga isticmaalaa dhammaan iskuullada Dugsiyada Dadweynha ee Saint Paul oo uu ka mid yahay iskuulka Groveland.

Waxaa ardayda si toos ah ula shaqeynaya **shaqaalaha bulshada iyo lataliyeyaal** si gaar ah iyo waliba si koox koox ah, si ardayda looga caawiyo koritaanka dhinaca bulshada iyo waliba dareenka.

**Kooxda Caawinta Ardayda - Student Assistance Team (SAT)** - waa koox ka tirsan xubnaha shaqaalaha oo mar walba kulma si ay ugu raadiyaan xal caqabadaha dhinaca hab-dhaqanka iyo waxbarashada. Macallimiinta ayaa ardayda la dhaqan-galiya hawshan caawinta ah.

**Kooxda Hab-dhaqanka ee Iskuulka Groveland** waa koox ka kooban guddi shaqaale ah oo kulamo u gala sidii ay u soo saari lahaayeen una dhaqangalin lahaayeen qorshaha guud ee habdhaqanka iskuulka. Kooxdani qiimayn iyo dib-u-eegid ayay ku sameeyaan qorshaha mar kasta oo loo baahdo.

## GROVELAND C.A.R.E.S

**Cooperation, Assertion, Responsibility, Empathy, Self-control**  
School Wide Expectations

	<b>Galidda/Bixitaanka</b>	<b>kafateeriyida</b>	<b>Waddooyinka/Jaranjarada</b>	<b>Musqulaha</b>	<b>Garoonka Ciyaaraha</b>	<b>Maktabada</b>	<b>Kulanka</b>
<b>C</b>	Laynka ha ka bixin	Sug inta lagaa fasaxayo	Si tartiib ah dhinaca midig ugu soco	Ilaali nadaafada musqulaha	Si caddaalad ah u ciyaara qof walbina wakhti ha la siiyo	Buugta iyo qalabka kale meeshoodii ku celi	Si fiican u dhagayso qofka hadlaya
<b>A</b>	Qof weyn u sheeg haddii aad caawin u baahato	Gacanta kor u taag haddii aad caawin u baahantahay	Noqo mid horseeda habdhaqan daggan	Si deggan oo dhakhsa ah ugu laabo fasalka	Haddii dhaawac ku gaaro ama ammaankaaga aad u baqdo, la hadal qof weyn oo masuul ah	Qof weyn weydiiso inuu kaa caawiyo raadinta buugta aad rabto	Noqo mid horseeda habdhaqan daggan
<b>R</b>	Si toos ah u aad goobta quraacda  Marka xilliga iskuulku dhamaado, la joog ardayda fasalkaaga ilaa uu basku kaaga imanayo ama waalidkaa uu kaa qaadayo	U soo gal ugana bax si habsami iyo tartiib ah  Nadiifi misskaaga	Soco  Si tartiib ahna u hadal	Noqo mid deggan oo aamusan  Gacmaha iska dhaq, isticmaal hal istaraasho oo kaliya ka dibna qashinka ku dar	Qalabka si nidaamsan u isticmaal  Waddada intaadan goynin, labada dhinac iska fiiri  Ha ka dhex bixin garoonka	Si tartiib ah u akhriso ka dib marka aad buugta qaadato	La fariiso ardayda fasalkaaga  "Show 5"  Sug inta lagaa fasaxayo
<b>E</b>	Caawi ardayda kale	Noqo mid u naxariista ardayda kale	Ixtiraam iyo xushmad sii fasallada  Noqo mid samir leh	Ixtiraam hawlaha gaarka ee dadka kale	Ixtiraam goobaha ay dadka kale ku ciyaarayaan  Soo sheeg wixii hagardaamo ah  Caawi ardayda kale haddii uu dhaawac gaaro  Dhammaan ha kala reebin dadka	Ku soo celi buugaagta xilligii lagu qabtay	Si fiican u dhagayso qofka hadlaya
<b>S</b>	Si tartiib ah oo	Ha kicin,	Isticmaal	Si tartiib ahna	Laynka gal	Si tartiib ah	Fariiso

deggan u soco	haddaad wax u baahto gacanta taag Si tartiib ahna u hadal  Soco	gacan-qabsiga jaranjarada  Gacmahaaga iyo lugahaagu adiga ha kugu koobnaadaan  Si tartiib ahna u hadal	u hadal  Gacmahaaga iyo lugahaagu adiga ha kugu koobnaadaan	marka laguu baaqo  Si deggan ku soo gal dhismaha	u hadal codkaagana gaabi	Jirkaaga aad ha u dhaq-dhaqajinin  Ku koobnow goobta aad fadhido
---------------	---	--	---	--	-----------------------------	--